HAWLQABAD [60-90 min] - Kooxo labo ama saddex ka kooban isku qaybiya oo dhex mara bulshada si aad u barataan salaadda socodka lagu ducaysto. In aad diiradda saartaan meel khaas aad ayey idiinka caawinaysaa oo idiinku sahlaysaa shaqadiinnan ugu horraysa. U baxa socodkiinna oo Ilaah ka dalbada inuu idinku caawiyo oo ku qaata 60-90 daqiiqadood hawlqabadkan.

OGSOONOW – Hubso oo aad dhaqan gelisa hannaankan B.L.E.S.S. U ducaysta sidan hoos ku qoran inta aydan bixin.

BARYO

Ugu dambayntii, halkan waxaa ah shan waddo oo aad ugu ducayn kartaa dadka aad la kulantaan marka aad ku jirtaan salaadda socodka lagu ducaysto:

Marka aad socodka ku ducaysanaysaan, u feejignaada fursadaha oo dhegaysta Ilaah Ruuxiisa Qudduuska ah si aad u aragtaan shaqsiyaadka iyo kooxaha aad la kulantaan ee ah ay tahay in aad u ducaysaan.

Waxaad odhan kartaan, “Waxaannu u ducaynaynaa bulshadan, dadoow miyaad og tihiin wax gaar ah oo aan idiinka ducaynno?” ama ku dheh, “Degaankan ayaan doonayaa in aan u duceeyo, miyaad ii sheegi kartaa wax gaar ah oo ay tahay inaan uga duceeyo?” Markii aad maqashid jawaabahooda, waxaad haddaana weyddiin kartaa baahiyadooda gaarka ah. Marka ay idinka la wadaagaan kaddib, dhaqaaqa oo u duceeya isla markaaba. Sidoo kale u duceeya baahiyada kuwa kale ee Ilaah idin garansiyo.

Isticmaal ereyga B.L.E.S.S. si ay kaaga caawiyo in aad xusuusatid 5-ta qaab ee aad ugu ducaynayso:

- **Jidh** [caafimaad]
- **Xoogsi** [shaqo iyo dhaqaale]
- **Dareen** [niyad]
- **Bulsho** [xidhiidho]
- **Ruuxiyad** [in Ilaah aad loo garto oo loo jeclaado]

Mararka qaar, dadku way ku farxaan in ay jiraan dad ka fakaraya oo raba in ay u duceeyaan.

Haddii qofka uu san Masiixi ahayn, waxa ay salaaddaadu u furi kartaa waddo ah is beddel xagga ruuxa ah iyo in aad sheekadaada la qaybsatid iyo sidoo kale Ilaah qisooyinkiisa. Waxaad ku casuumi kartaa barashada Kitaabka ama guryahooda ayaad ugu tegi kartaan.

Haddii qofku uu Masiixi yahay waxa uu ku casuumi kartaan inuu salaaddiinna ku soo xidhmo. Ama aad u tababbartaan sidii ay salaadda socodka ah ugu ducaysan lahaayeen iyaga oo isticmaalaya salaadda socodka oo eegaya meelaha diiradda la saarayo sida B.L.E.S.S. ugu ducee in ay qoyska Ilaah ahaan u koraan.



HAWLQABAD [15 daqiiqo] - Isu qaybiya koox labo ama seddex ah oo 15 daqiiqadood ee soo socda ku qaata inaad baryo ku dhaqan gelisaan ducada B.L.E.S.S. shan meelood oo kala duwan ducada ku qaata idinka oo adeegsanaya B.L.E.S.S. ugu duceeya dadka oo ficil ahaan u sameeya qaabkan, si aad dadka kale u bartaan qiimaha ku jira adeegsiga nidaamkan.B.L.E.S.S. Ducada ku adkaada.

KULANKA 6AAD

Kulankan, waxa aan ku baran doonnaa sida Ilaah u adeegsado rumaystayaasha iimaanka leh - xitaa haddii ay cusub yihiin - Isaga oo adeegsada in ka badan kuwii aqoonta yeeshay ee muddada joogay balse aan doonayn in ay Isaga raacaan. Waxa aan eegaynaa waddo loo wada kulmi karo oo ay xertu si dhaqsiyo ah ugu badan karto.

Nidaamka Kooxaha ee 3/3

Ciise waxa uu yidhi -- “meeshii laba ama saddex qof ay magacayga isugu soo ururaan, halkaas anigu dhexdoodaan joogaa.”

Taasi waa ballan xoog badan, waana mid rumaystayaasha Ciise u ah faa’iido weyn. Balse marka aad koox ahaan isugu timaaddaan, sidee ayaad waqtigiinna u qaadanaayan?

Kooxda 3/3 waa kuwa isku qaybiya saddexda ee waqtigooda saddex qaybood ahaan u wada qaata, oo waxa ay iyaga oo wada jooga u qaadana karaan una samayn karaan waxyaabaha muhiimka ah ee uu Ciise Masiix ku amrayo.

Halkan ayaan ku arkaynaa qaab ay u shaqayso:

DIB U EEG 1/3 waqtigaaga]

Daryeel iyo Duco: Qofkiiba sii wakhti uu idinkula wadaago waxa uu doonayo inuu Ilaah uga mahad celiyo. Dabadeedna waxa qof walba haya ee uu la hardamayo. Ha looga duceeyo qofba waxa haya ee uu idinla wadaagay. Haddii qof idiin sheegay wax uu la hardamayo oo fiiro gaar ah u baahan, qofkaas waa in daryeel gaar ah loo muujiyaa.

Aragti: Qasiidooyin wada qaada jacaylka Ilaah, in kuwa kale la jeclaado, farriinta Ciise masiix oo kuwa kale lala wadaago, bilaabis kooxo cusub, oo iyaguna sidan oo kale sameeya. Dadku waxa ay wadaagi karaan doorashooyin ah qoraallo ku aaddan waxyaabaha aan imminka sheegnay.

Baadhis: Qof kastaa ha idinla wadaago sidii ay go’aanka uga noqotay dhaqan gelin wax barashadii usbuucii hore ee uu qoray:

1. Sideed u addeecday wixii aad baratay?
2. Yaad ku tababbartay wixii aad baratay?
3. Kumaad la wadaagtay sheekadaada ama Qisooyinka Ilaah?



Haddii ay illoobeen hor gelintii ama ay fursad u waayeen, waa in hawshii toddobaadkii hore la raaciyaa isla toddobaadkan hawshiisa. Haddii qof uu diido wax ay si toos ah xagga Ilaah uga maqleen waxaa loo dirayaa edbin xagga kaniisadda ah.

BAADH [1/3 ee waqtigaaga]

Tuko: Si fudud oo kooban Ilaah ula hadal. Ilaah weyddiiso inuu ku baro qoralkan.

Akhri oo Falanqee: Akhri qoraalka toddobaadkan. Falanqee su'aalaha soo socda:

1. Maxaad ka dhex jeclaatay qoraalkan?
2. Maxaad ku dhex aragtay oo aad kuugu adkaaday in aad fahanto? Akhri qoraalka toddobaadkan mar kale.
3. Maxaan ka baran karnaa dadka ku jira qoraalkan?
4. Maxaan ka baran karnaa Ilaah qoraalkan dhexdiisa?

HORAY U EEG [1/3 ee wakhtigaaga]

Addeec. Tababbar. La Wadaag. : Shan daqiiqadood ku qaata duco aammusnaan ah. mid kasta oo kooxda ka mid ahi ha ku ducaysto in Ruuxa Qudduuska ahi tusiyo sidii looga jawaabi lahaa su'aalaha, deetana go'aan ha loo yeesho. Mid walbaa waa inuu qoraa go'aanka oo uu ka duceeyaa ku adkaysashada iyo isu xisaabinta. Way dhacdaa in aysan maqlin waxyaabaha la xidhiidha su'aalaha toddobaad kasta.

Waa in ay xusuus qoraal ah ka samaystaan haddii ay ogaadeen iyo haddii aysan u caddayn in Ilaah u muujiyey oo ay ka maqleen, oo ha eegeen wixii ay u arkayaan fikir wanagsan illaa laga arkayo arrinta.

5. Sidee ayaan u dhaqan gelin karaa qoraalkan Kitaabka?
6. Kumaan tababaraa ama aan la wadaagaa tuducdan?
7. Kumuu Ilaah iga doonayaa in aan la wadaago sheekadayda [Markhaati furkayga] ama Qisooyinka ilaah usbuucan dhexdiisa?

Ficil u Qabasho: kooxaha labada ama saddexda ah, waa in aad ficil ahaan u qabataan wixii la idiinka amray su;su'aasha 5, 6 ama 7. Tusaale ahaan, door ka qaado wada sheekaysiga adag ama jarribaad adag; barista qoraalka Kitaabka ee maanta, ama ficil u qabashada wadaagista Injiilka.

La Hadal Ilaah: Isla kooxaha dhexdooda, mid kasta shakhsi ahaantiisa ugu duceeya. Ilaah weyddiista inuu diyaariyo qalbiyada dadka maqli doona farriinta Ciise Masiix toddobaadkan. Weyddiista inuu idin siiyo xoog iyo xikmad aad ugu adkaataan go'aankiinna. Imminka waa gaboggabadii kulanka.

Marka mid waluba uu dhammeeyo, wadaaga Cashada Rabbiga ama cunto wada cuna.

XUSUUSMOW – Waxaa jira qoraallo Kitaabka ah oo kooxihinna 3/3 ah qaadanayaan oo isku xigxiga oo ku qoran Buugga Hagaha ah ee Tusmo Hoosaadkiisa.




KULANKA 7AAD

Kulankan, waxa aan ku baran doonaa hab lagu magacaabo Tababbarka Wareegga ah kaasoo xerta ka caawinaya in ay dad badan noqdaan oo ay hawlqabad weyn leh. Sidoo kale waxa aan ficil ahaan u qaban doonaa Nidaamka Kooxaha ee 3/3 oo aad ku baranaysaan in hadba sida aad u kulantaan aad u badanaysaan.

Tababbarka Wareegga ah

Tababbarka Wareegga ahi waa hab ah Tusaale, Kalkaalid, Ilaalin, iyo Dhaqaaq, sidan ayuuna u sheqeeyaa:



QAABAYN – Qaabayntu waa tusaale aalad ah oo kaa caawinaya sidii ficil ahaan aad wax ugu fulin lahayd. Waa tababbarka wareegga oo si kooban loo soo gaabiyay. Waxa uu u baahan yahay oo qudha in hal mar la wada qabto. Oo weeye oo qudha in la aburo qaab la wada og yahay oo si guud ahaaneed loo wada qabto. Qaabayntu ma ahan dardar gelin qofka la siinayo ee waxaa weeyaan oo firfircooni gelinaya. Waxaa loo baahan yahay in xirfadaha si shaqsi ahaaneed la isugu dayo.

Macnaha QAABAYNTU waxaa weeyaan sida marka carruurtu ay arkaan qof baaskiilad wadaya..



KALKAALID – Kalkaaliddu waxaa weeye iyada oo qofka tababbarana loo oggolaado inuu ficil ahaa u sameeyo xirfadda. Tani waxa ay qaadanaysaa waqti ka badan wejiga Qaabaynta. Waxa ay doonaysaa “gacan qabasho” uu qofka hagaha ahi samaynayo. Hagaha waxaa looga baahan yahay inuu noqdo jiheeye door dardar leh ka qaata ilaalinta qofka tababbarayana. Wejigani si adag uma shaqeeyo illaa uu qofka tababbaranaya uu noqdo mid isagu wixii samayn kara, oo ah inuu si aasaasi ah u fahmo xirfadda. Mar kasta oo in dheer la sii wado nidaamkan, qofka tababbaranayaa waxa uu noqonayaa mid tiirsane ku noqda hagaha mana noqonayo mid si buuxda u fuliya xirfadda. Ugu dambaynta wejiga kalkaalidda waxaa lagu so oaf jarayaa in qofka tababbaranayaa uu hage u noqdo dad kale.

KALKAALIDDA waxaa la yidhaa sida marka ay waalidku ilmaha la celcelinayaan.

ILAALIN – Ilaalinta wejigeedu waa mid dheer. Waxaa ku jira xidhiidh aan toos ahayn oo lala yeelanayo qofka tababbaranaya. Waxaa la raadinaya in qofka tababbaranayaa uu noqdo mid ku tartama ama dhab ahaan u fuliya sida ay xirfaddani tahay. Waxa ay noqon kartaa mid la mid ah ama toban jibbaar ka badata labadii weji ee hore oo la isku daray. Hadba sida qofka tababbaranayaa uu horumar uga sameeyo xirafaddan, ayuu uga maarmayaa qofka isaga hagaya. Wejigan waxaa tababbarataha fuulaysaa masuuliyad joogto ah oo ah fulinta xirfadda iyo aragtida laga leeyahay. dhammaadka wejigan waxaa looga gol leeyahay in qofka tababbarayaa uu xirfaddan u gudbiyo illaa farac afraad oo uu kiciyo oo ah kuwa uu isagu ilaalada ka yahay.

Marka waalidku ay ogaadaan baaskiilad koridda ilmaha oo ay xaqiiqsadaan inuu xirfado iyo aqoon ku filan u leeyahay ayaa la yiraahdaa ILAALIN.

DHAQAAQ – Dhaqaaqu waa nooc qalin jebinta ka mid ah oo ah marka qofka tababbarayaa uu isaga qudhiisu noqdo hage. Xidhiidhka waqtiga ah iyo hagiddu waa ay sii soconayaan haddii qofka tababbaranaya iyo haguhu ay isku meel ka shaqaynayaan

Marka waalidku fasaxaan in ilmuhu kaxaystaan baaskiiladda ayaa lagu magacaabaa DHAQAAQ.

Ficil ahaan u Samee Nidaamka Kooxaha ee 3/3

HAWLQABAD [90 daqiiqadood] – 90 daqiiqadood kooxdaadu ha ku qaadato qaabka 3/3 ee koox ahaaneed ee ku jirta bogga 19-20.

- **DIB U EEG** – isticmaal waxyaabihii adkaa ee ku jiray kulankii toddobaadkii la soo dhaafay “Aamminnimo”
- **BAADH** - Adeegso oo kooxdaadu ka akhriyeen Maarkos 5:1-20 oo ha kaga jawaabeen su’aalaha 1- 4
- **HORAY U EEG** – adeegso su’aalaha 5, 6, iyo 7 si aad u horumariso sidii aad au addeeci lahaydeen, tababbar ugu qaadan lahaydeen oo aad dadka kale ula wadaagi lahaydeen.

XUSUUS – Qayb kastaa waxa ay qaadanaysaa 1/3 [ama 30 daqiiqo] oo waqtigiinna layli qaadashada ah.



KULANKA 8AAD

Kulankan, waxa aan ku baran doonnaa sida ay Hoggaamiyeyaasha Asalka ahi u diyaariyaan sidii ay xertooda uga soo saari lahaayeen kuwo iyagu hoggaamiyeyaal noqda. Waxa aan aan ku baran doonnaa ku arki donna sidii in kuwa kale loo adeego ay u ahayd nidaamkii qaab hoggaamineed ee Ciise Masiix. Waxaan mar kale waxaan ficila ahaan u samayn doonnaa habkii koox ahaaneed ee 3/3.

Hoggaaminta Unugga ah

Hoggaaminta Unugga ahi waa waa qaabka 3/3 ee koox ahaaneed oo ay wax barashadoodu ku haqab tiranto sida kan ku jirta [9-kulan ee koorsooyinka Tababbarka Zúme]. Ujeedku waxaa weeye in koox dad ah loo qalabeeyo sidii ay u bixi lahaayeen oo ay u aasaasi lahaayeen kooxo iyaga u gaar ah oo ay u dhisi lahaayeen unugyo hoggaamineed marka la gaadho geboggabada tababbarka.

Qaabkan waxaa loo isticmaali karaa duruufo dhawr ah. Waxaa loo adeegsan karaa kooxaha hadba meel u guura sida reer miyi, arday, iwm. Tan kale waxaa loo adeegsan karaa dad iyagu horay Masiixiyiin u ahaa oo u baahan in loo tababbaro sidii ay shaqsi ahaantooda u bilaabi lahaayeen in ay samaystaan kooxo iyagu sameeya kooxo kale. Sidoo kale waxaa la adeegsan karaa haddii ay jiraan dad iimaanka qaatay balse aanay jirin fursad si toos ah loogula socon karo ama waqti ku filan lagula joogi karo.

Mar kale Ficil ahaan u Samee Nidaamka Kooxaha ee 3/3.

HAWLQABAD [90 daqiiqadood] – 90 daqiiqadood kooxdaadu ha ku qaadato qaabka 3/3 ee koox ahaaneed ee ku jirta bogagga 19-20.

- **DIB U EEG** – isticmaal waxyaabihii adkaa ee ku jiray kulankii toddobaadkii la soo dhaafay “Aammminimo”
- **BAADH** - adeegso oo kooxdaadu ha akhriyeen Maarkos 5:1-20 oo ha kaga jawaabeen su’aalaha 1- 4
- **HORAY U EEG** – adeegso su’aalaha 5, 6, iyo 7 si aad u horumariso sidii aad au addeeci lahaydeen, tababbar ugu qaadan lahaydeen oo aad dadka kale ula wadaagi lahaydeen.

Dhexdiinna hoggaanka isku warwareejiya kulanka oo dhan si mid waliba uu u helo fursad uu wax ku hoggaamiyo, ugu duceeyo ama uu su’aalo ku weyddiyo. Waxa socda isku dhiirri geliya oo isku kor meera wixii si gaaban ficil ahaan loogu qaban karo, iyo wixii tallaabada labaad ay xubnaha kooxdu ku sii wanaagsanaan karaan oo ay aad ugu sii kori karaan.

XUSUUS – Qayb kastaa waxa ay qaadansaa 1/3 [ama 30 daqiiqo] oo waqtigiinna layli qaadashada ah.



KULANKA 9AAD

Kulankan, waxa aan ku baran doonnaa sida qaabka ku tiirsanaantu ay dib u dhac u geliso koritaanka boqortooyada iyo sida fikirka toosani uu kaaga caawinayo badashada xerta. Waxaan soo saari doonnaa sida waqtigu uu qayb uga yahay xer samaynta iyo si aan xawli uu socodkeenna u dardar gelayno. Waxaaan ku baran doonnaa sida kuwa Ciise Masiix raaca ay uga mid noqon karaan Labo Qayb Kaniisadood si iimaankoodu u adkaado, oo ay ruux ahaan u noqdaan qoysas ka mid bulsho ballaadhan oo rumaystayaal ah. Ugu dambayntii, waxa aan ku baran doonnaa Qorshe 3-Bilood ah oo si fudud kuu siin kara inaad diiradda saartid dadaaladaada oo aad u labo jibbaartid firfircoonidaada aad qoyska Ilaah ugu korinaysid si isbeddel weyn leh.

Qorshe 3-Bilood ah

Maaddaama oo aad imminka baratay adeegyo kugu filan oo ah sida xerta loo sameeyo, qaado waqti salaadeed oo Rabbiga ka bari wixii uu kaa doonayo inaad ku samayso saddexda bilood ee soo socota. Markii aad Isaga dhegaysigiisa waqti ku qaadatid, dabadeed qorshahan soo socda degso. La wadaag qorshahaaga kuwa kula tababbaranaya oo degsada jadwal masuuliyad leh marka uu madkiinba midka kale uu qalad saarayo tan oo ah 1, 2, 3, 4, 6, 8, iyo 12 toddobaad oo hadda laga bilaabay.

Waxaan sheekadayda [Markhaati furkayga] iyo Ilaah Qisooyinkii [Injiilka] la wadaagayaa kuwan shakhsiyaadkan ama dadkan soo socda:

Waxaan dadkan soo socda ku casuumi doonaa in aan Koox Masuuliyad leh wada noqonno:

Waxaan dadkan soo socda hor dhigi doonaa in ay shakhsi ahaantooda u bilaaban Koox Masuuliyad leh oo aan sida loo sameeyo u tababbari doonaa:

Waxaan dadkan soo socda ku casuumi doonaa in ay ila bilaabaan Kooxda 3/3:

Waxaan dadka soo socda hor dhigi in ay shaqsi ahaantooda u bilowdaan Kooxda 3/3 oo aan u tababbari doonaa dida loo sameeyo:

Waxaan dadkan soo socda ku casuumi doonaa in ay ka qayb qaataan 3/3 ee Rajada ama Wax-soo-shaac-bixinta [eeg Tusmo Hoosaadka]:

Waxaan dadka soo socda ku casuumi doonaa in ay igala qayb qaataan Salaadda Socodka:

Waxaan dadkan soo socda u qalabayn doonaa sidii ay sheekooyinkooda iyo Ilaah Qisooyinkiisa ula wadaagi lahaayeen Taxii ama Liiskii 100-ka ahaa xagga qaab xidhiidhka ay dadka la yeelanayaan:

Waxaan dadka soo socda hor dhigi doonaa in ay Ducada Wareegtada ah u isticmaalaan marxaladaha aasaasiga ah:



Waxaan Salaadda Wareegtada ah isticmaali doonaa hal mar _____ [maalmood/ toddobaad / bilood].

Waxaan Salaadda Socodka ku ducaysan doonaa hal mar _____ [maalmood / toddobaad / bilood].

Waxaan dadkan soo socda ku casumi doonaa inay ka mid noqdaan Unugga Hoggaaminta ee aan ku hoggaamin doono: Waxaan dadkan soo socda ku dhiirri gelin doonaa in ay wada

maraan koorsada Tababbarka Zúme:

Talo bixinno kale:

TABABBAR HORUMARSAN KULANKA 10AAD

Tababbarkan horumarsan dhexdiisa waxa aan ku eegi doonaa sidii aan sare ugu qaadi lahayn Xoogagga Tababbarrada annaga oo adeegsanayna liiska hubinta ee qiimaynta. Waxaan ku baran doonaa sida Hoggaanka Isku-xidhku uu kooxaha uga dhigo kaniisado yaryar oo ay uga wada shaqayn lahaayeen wax intaas ka sii badan. Oo waxa aan sidoo kale ku baran doonaa sida Kooxaha eegista iyo Hagidda loo horumariyo yeelashada korintaan aad u sarreeya.

Liiska Hubinta Tababbarka

Liiska Hubinta Tababbarku waa qalab awood leh oo aad u adeegsan karto sidii aad si dhakhso ah ugu qiimayn lahayd xoogaggaaga iyo dayacaadahaada ma la eegayo sida loo sameeyo xerta badata ama taranta. Sidoo kale waa aalad xoog leh oo aad kuwa kale - kuwa kalena ay kugu caawin karaan.

Adeegso tallaabooyinkan so socda in ah [5-daqiiqadood ama ka yar] si aad isku qiimayso:

- **TALLAABADA 1** - Akhri wixii aad illaa iyo hadda ka soo baratay Tababbarrada Xernimada adiga oo eegaya dhanka bidix ee shaxda Liiska Hubinta.
- **TALLAABADA 2** – Calaamadee mid kasta oo qalabkan tababbarka ah, adiga oo isticmaalaya habka soo socda:
 - Haddii aadan aad u aqoon ama aadan fahmin, eeg shaxda dhanka MADOW.
 - Haddii aad garanaysid balse aadan hubin eeg shaxda dhanka CAS/GUDUUDAN
 - Haddii aad fahantay oo aad tababbar ku bixin kartid qaybta aasaasiga ah eeg shaxda dhanka HURUUDDA/JAALLAHA ah
 - Haddii aad isku kalsoon tahay oo aad buuxda tababbar ugu bixin kartid wixii aad baratay eeg shaxda dhanka AkHTARKA/CAGAARAN.



XUSUUS – Hubso in liiskaaga hubinta aad natiijooyinkiisa la wadaagtid tababbaraha ka socda Zúme ama qof tababbarka qayb kaala ah ama qof kale oo ku haga. Haddii aad qof u tahay tababbare ama hage, tusi qalabkan si uu u qiimeeyo meelaha uu fiiradaada iyo tababbarkaaga uga baahan yahay.



LIISKA HUBINTA EE TABABBARKA

MADOW: Ku tababbar warbixin cusub adiga oo ka habsanaya xagga fahanka.

CASAAN: Joogso oo la joog illaa ay qataan inta aasaasiga ah.

HURRUUD: Ilaali illaa ay karti sal leh ka helaan.

CAGAAR: Tag oo ka dhaqaaq kana raadso kuwo kale oo aad horumariso

Tusaale	Caawin	Ilaalin	Tegid
Aan war qabin	Aan xirfad laheyn	Tartami kara	Xirfad leh
Doorka Hagaha			
Haguhu waxa uu bixiyaa Jiho iyo Warbixin	Haguhu waxa uu bixiyaa Jiho iyo Caawimaad	Haguhu waxa uu bixiyaa Caawimaad iyo Dhiirri Gelin	Haguhu waxa uu helaa wixii soo kordha
Sida Qorshayaasha loo Sameeyo			
Hagaha ayaa go'aamiya	Hagaha/l ayaa wada hadla Hagaha ayaa Go'aamiya	Hagaha/l ayaa wada hadla La Hagaha ayaa Go'aamiye	La Hagaha ayaa Go'aamiya
Tababbarka Xernimada			
Sheeg Sheekadaada [Markhaati fur]			
Sheeg Qisooyinka Ilaah [Injiilka]			
Wakiilnimada Xidhiidhada – Liiska 100-ka			
Xawaaraha			
Adeegga aan Shuruudda Lahayn			
Qaabka Kooxaha ee 3/3			
Kaniisad Yar - Jeclow Ilaah/Kuwa kale, Xer Samee			
In Qayb laga Noqdo Labo Kaniisadood			
Wareegga Tababbarka			
Kooxo Is Xisaabin leh			
Shaqsi-Quudin:			
<ul style="list-style-type: none"> • Ereyga oo laAkhriyo Maalin Walba [addeecis] • Baryo - Hadal & Dhegayso [Qaab Wareegga Salaada] • Nollosha Jirta - Wehelnimo [Midba Midka Kale] • Silica & Taag darrida 			
Indho lagu Arko Halka aanay Boqortooyadu ka Jirin			
Raadinta Qofka Nabadda [Mt. 10 Lk. 10]			
Salaadda Socodka ah			
In Kaniisad la Noqdo:			
<ul style="list-style-type: none"> • Isweheshi Fellowship [Wax wada Cunid, Midba Midka] 			

QALABKA TABABBARKA



Kale]				
• Ammaan & Caabudis				
• Baybalka [Addeec, Tababbar]				
• Dadka oo Loo Sheego Wax ku Saabsan Ciise [La Wadaagis]				
• Baabtiis/Maquurin/Quusin				

Kooxaha Hagista

Ciise waxa uu yidhi - “Waxaan idin siinayaa qaynuun cusub oo ah: Waa inaad isjeclaataan; sidaan idiin jeclaaday, idinkuna waa inaad isu jeclaataan. Sidaasay dadka oo dhammi idinku garan doonaan inaad xertaydii tihiin, haddaad jacayl isu qabtaan.”

Kooxaha Hagistu waa kuwo ka kooban dad wax hoggaaminaya oo bilaabaya Kooxaha 3/3. Waxaa sidoo kale raaca nidaamka 3/3 waana qaab awood leh oo lagu eegayo shaqada ruuxiga ah ee caafimaadka qabta ee degaankaaga ka socota.

Kooxaha wax hagayaa waxa ay adeegsadaan nidaam haggis ah oo hoggaanba uu hoggaanka kale hagista jihataynta ugu gudbinayo loona sii gudbinayo shaqsiyaad kaniisadda ka mid ah, ama loo gudbinayo ururro adeegga wada, ama xitaa kaniisadda caalamiga ee adduunka.

Ka qayb galayaasha kooxda hagistu waxa ay eegaan ujeedooyinka wax ku oolka ah iyaga oo raacaya qaabkii Ciise u dejiyay adeegga iyaga oo su’aalo weyddiinaya dadka wixii ka soo baxana u sheegaya. Kulannadan wax barashadu ma ahan kuwo qofka hab dhaqankiisa kor loogu qaadayo ama hoos loogu dhigayo. Waa kuwo tilmaan iyo waxyi ah.

Isticmaal qaabkan fudud:

DIB U EEG [1/3 oo waqtigaagii ka mid ah]

Saddex meelood oo meel – ku qaado waqtigaaga duco iyo daryeel sidii adiga oo ka mid ah Kooxaha aasaasiga ah ee 3/3. Intaas kaddib waxa aad eegtaa kooxda aragtideeda iyo ku iimaan qabkooda waxyaalihii horay loo siiyay:

Intee in le’eg ayaad Masiixa ku tiirsan tahay? [Qorniinka, baryo, aamminaad, baarrinimo, xidhiidhada muhiimka ah?] miyey kooxdaadu dhammaysay qorshayaashii aad lahayd ee kulankii ugu dambeeyay? Dib u eegid ku samee.

BAADH [1/3 waqtigaaga ka mid ah]

Miyey kooxdu ka wada hadashay su’aalahan fudud ee soo socda:

1. Sidee ayaad u samaynaysaa qayb walba oo ka mid ah dhaayagaramka Afarta Boos?
2. Maxaa si hagaagsan u socda? Caqabadaha ugu waaweyni maxay yihiin?
3. Dib u eeg maabkaaga halka aad kaga jirtid.
4. Maxaa caqabad kugu noqday maxaase kugu adkaaday oo aad fahmi weysay?
5. Muxuu Ilaah ku tusay dhawaanahan?
6. Miyey jiraan wax su’aalo ah oo ka yimid hoggmiyeyaashii la diray ama ka qayb galayaal kale?



HORAY U EEG [1/3 oo waqtigaaga ka mid ah]

Qaado waqti ducó ah adiga oo Ruuxa Qudduuska ah ka dalbanaya in mid walba oo kooxda ka tirsan uu u muujiyo sidii su'aalahaan looga jawaabi lahaa:

7. Maxaa qorshayaal ama hadaf ah oo uu Ilaah iga doonayaa inaan dhaqan geliyo ka hor inta aynaan isku iman waqtigeenna dambe? [Isticmaal qaabka Afarta Boos si uu kaaga caawiyo diirad saaridda shaqadaada]
8. Sidee buu hagayhaygu ama xubno kale oo kooxda ka mid ahi iiga caawin karaa shaqadan?

Ugu dambayntii koox ahaan u wada qaata baryo aad Ilaah kula hadlaysaan.

Koox ahaan u ducaysta si mid kasta oo xubin ah loogu duceeyo oo Ilaah weyddiista inuu idiin diyaariyo qalbiyada kuwa kooxdu ay rabto in ay gaadho.

Ilaah ka barya in xubin walba oo kooxda ka mid ah uu siiyo dhiirranaan iyo xoog oo ay addeecaan wixii Ilaah uu ku baray kulankan dhexdiisa. Haddii hogaamiyaha sare uu u baahan yahay inuu u duceeyo hoggaamiyaha yar, imminka ayaa ah waqtigii ku habboonaa ee uu u ducayn lahaa.

Maaddaama kooxahani ay had iyo goor meel fog ku kulmayaan, ma suurtoobayso in loo dabbaal dego Cashada Rabbiga ama cunto la wadaago, balse waa inaad lahaataa waqti aad ku eegaysid wax ku saabsan caafimaadka iyo qoyska iyo saaxiibbada.



Ogaanshaha Shaxda Afarta Boos



Booska Badashada: kuwee, sidee iyo goormee ayaad u xulaysaa dadka iimaanka leh ee aad u qalabaynaysa in ay qabtaan oo ay badinta xerta aammin u noqdaan?

Boos Madhan: halkee iyo kuwee ayaad [dad noocce ah] qorsheensaysaa inay Boqortooyadu ku dhex fiddo?


Midho ku Beeridda Booska: halkee iyo kuwee ayaad la wadaagaysaa warka wanaagsan ee Boqortooyada? Sidee ayaad middaas u samaynaysaa?

Boos Koraya: sidee ayaad u qalabayn kartaa oo aad ugu korin kartaa dad ruux ahaan, shaqsi ahaan kuwaasoo mujtamacooda ku dhex nool?

Midho Goosiga Beerta: sidee ayaa qoysas xagga ruuxa ah ama [kaniisado yaryar] loo samayn karaa?



Qaabaynta Maab Guud oo ka Tarjumaya Kaniisadda



Magaca hogaamiyaha kooxda



Meesha/ wakhtiga la bilabay



Lifaaq



Sida Kooxaha 3/3 Isugu Xigaan

RAJADA IS DABA SOCOTA [EE DOONAHA]

Isticmaal qoraallaadan kitaabka ee soo socda marka aad “BAADHIS” ku samaynaysid kooxdaada. Kooxdaadu waxa ay u baahan kartaa in hal kulan ka badan qorraallada qaar.

1. Rajada dembiilaha: Luukos 18:9-14
2. Rajada kuwa saboolka : Luukos 12:13-34
3. Rajada kuwa baxsaday: Luukos 15:11-32
4. Rajada kuwa lunsan: Luukos 19:1-10
5. Rajada kuwa murugaysan: Yooxannaa 11:1-44
6. Rajada kan ereyga doona: Yooxannaa 3:1-21

CALAAMADAHA YOOXANAA SIIYAY [KAN EREYGA DOONAYA]

Isticmaal qoraallaadan kitaabka ee soo socda marka aad “BAADHIS” ku samaynaysid kooxdaada. Kooxdaadu waxa ay u baahan kartaa in hal kulan ka badan qorraallada qaar.

1. Biyihii oo loo beddelay qamro canab ah: Yooxannaa 2:1-12
2. Wiilkii sirkaalka boqortooyada ee la bogsiiyay: Yooxannaa 4:46-54
3. Bogsiintii cuuryaanka: Yooxannaa 5:1-17
4. Quudintii shanta kun: Yooxannaa 6:1-14
5. Ku dul socoshadii biyaha: Yooxannaa 6:15-25
6. Bogsiintii ninkii indho la'aanta ku dhashay: Yooxannaa 9:1-41
7. Laasaros oo dhimashadii laga soo sare kiciyay: Yooxannaa 11:1-46

BILAABISTA WADDADA: 8-da KULAN EE UGU HORRAYSA

Tani waxa ay aad ugu fiican tahay dadka iyagu Masiixiyiinta horay u ahaa, balse aan horay uga qayb gelin kooxo noocan oo kale ah. Tan waxaa loo samaynayaa koox ahaan 8-da kulan ee ugu horreeya. Shaqada shaqsiga ahi waxa ay bilaabanaysaa marka la gaadho kulannada xooggan.

1. SHEEG SHEEKADAADA

BAADH: Maarkos 5:1-20. Feejignaan dheeraad ah sii aayadaha 18-20.

HAWLQABAD: Marka aad sheekadaada bixinaysid waxa aad u baahan tahay inaad sheekadaada soo diyaar garaysatid oo aad rabtid inaad la wadaagtid dadka marka aad ka hadashid wax ku saabsan Ciise. Halkaan waxaa ah sida aad sheekadaada u sheegi kartid:

- Ka hadal noloshadii intii aadan Ciise raacin ka hor - Qeex dareennadaada [xanuun, kelinnimo], xusuuso su'aalaha sida [maxaa dhacaya dhimashada kaddib?], ama waxyaabo aad la hardamaysay intii aadan Ciise raacin ka hor.
- Ka hadal sidii aad Ciise ku raacday-U Sheeg wax ku saabsan Ciise! Qisada muhiimka ah ee ku saabsan Ciise waxaa weeye: Waxaannu nahay kuwo Ilaah hortiiisa ku gar daran dembiyadeenna awgeed: Dembiyadeenna awgeed ayaan u dhiman doonaa. Balse dembiyadeennii waa nalaga cafinayaa marka aan iimaankeenna saaranno Ciise, oo ah kii u dhintay dembiyadeenna, ee la aasay, ee dhimashadii ka sare kacay.
- Ka hadal noloshada intii aad Ciise raacday kaddib -U sheeg sidii Ciise uu noloshadii u beddelay. U sheeg farxaddii, nabaddii, iyo cafiskii Ciise bixiyay.
- Dadka sii in ay wax ku weyddiiyaan - Sheekadaada waa in wax lagaa



weyddiiyaa. Ku soo gaboggabee su'aal kaa caawinaysa in aad ogaatid heerka qofku uu xagga ruuxa danaynayo. Waxaad weyddiisaa: "Miyaad doomaysaa in aad ogaatid sida lagu cafiyi karo?" ama "Miyaad doonaysaa in Ilaah noloshaada beddelo?"

- Haddana in yar sii wad [3 saddex daqiiqadood ama in ka yar]-Sheekadaadu waa in ay ahaataa mid gaaban oo xiiso leh. Ha is dareen siin wax cajis ah ama inaad waqti dheer hadashid si qof ku dhegaysanaya uusan waxa uu danaynayo uga lumin.
- Marka hore qof ka mid ah kooxda u sheeg sheekadaada.
- Dooro shan qof oo aad u sheegto. Ilaah weyddiiso in uu kuu muujiyo dad aad la wadaagtid sheekadaada usbuucan.

2. QISADA CIISE

BAADH: 1 Korintos 15:1-8, Rooma 3:23, Rooma 6:23

FICIL U SAMAYN: Qof kooxda ka mid ahi ha sheego qisada Ciise isaga oo qaabka uu doono adeegsanaya balse ah mid sahlan. 5 qofood u sheeg sheekadaada iyo qisada Ciise toddobaadkan. Samee midan toddobaad kasta.

5. BAYBALKKA

BAADH: 2 Timoteyos 3:14-16

FICIL U SAMAYN: Dusha ka xifdi oo sheeg 7-dii su'aalood ee barashada Kitaabbka [su'aalihii 1-7 ee ku jiray Habka Kulanka Fudud].

U sheeg 5 qofood sheekadaada iyo qisada Ciise toddobaadkan. Samee midan toddobaad kasta..

3. LA SOCO OO KALUUMAYSO

BAADH: Markos 1:16-20

FICIL U SAMAYN: Samayso liis 100 qofood ka kooban oo ah dad aad garanaysid sida [qoys, saaxiibbo, deriska, kuwaad wada shaqaysaan ama kuwo aad isku galas tihiin] oo doonaya in ay maqlaan wax ku saabsan Ciise. Sheekadaada u sheeg 5 qofood toddobaadkan. tan samee toddobaad kasta.

4. BAABTIIS

BAADH: Rooma 6:3-4; Falimaha Rasuullada 8:26-40

FICIL U SAMAYN: Raadso biyo kuu dhow sida [meesha qubayska, barkad, webi, haro] oo rumaystayaasha cusub oo dhan ku baabtiis. Sii wad inaad dadka baabtiisto isla marka ay Ciise u yimaaddaan. Si aad wax sii badan baabtiiska uga baratid, eeg, Falimaha Rasuullada 2:37-41, 8:5-13, 8:36-38, 9:10-19, 10:47-48, 16:13-15, 16:27-34, Falimaha Rasuullada 18:5-9 iyo 1Korintos 1:10-17, Falimaha Rasuullada 19:1-5, Falimaha Rasuullada 22:14-17. U sheeg 5 qofood sheekadaada iyo qisada Ciise toddobaadkan. Samee midan toddobaad kasta.

6. LA HADAL ILAAH BAADH: Matayos 6:9-13

FICIL U SAMAYN: Isticmaal gacantaada si aad u baratid sida Ilaah loola hadlo. Koox ahaan ugu ducaystaa Baryada Rabbiga ee ku jirta Matayos 6:9-13 idinka oo gacantiinna u adeegsanaya sidii hage oo kale.

1. Calaacal = Xidhiidh. Sida calaacashu ay muhiim ugu tahay faraheena iyo suulka, ayaa waqti yar oo aan Ilaah la yeelanaa uu muhiim ugu yahay xidhiidhkeenna aan Isaga la



leenahay. “Aabbahayaga Jannada ku jirow...”
[Matayos 6:9]

2. Suul = Caabudaad. Suulkayagu waxa uu ina xusuusinayaa in aan Ilaah caabudno ka hor inta aynaan wax weyddiisan.
“...magacaagu qudduus ha ahaado.”
[Matayos 6:9]

3. Farta ugu Horraysa = Isu Dhiibid. Tan xigta waxa aan nolosheenna, qorshayaasheenna, qoyskeenna, dhaqaalaheenna, shaqadeenna,
4. Mustaqbalkeenna, iyo wax walba Isaga. “Boqortooyadaadu ha timaado, doonistaada dhulka ha lagu yeelo...” [Matayos 6:10]
5. Farta Dhexe = Weydiisasho. Dabadeed waxaan Ilaah weyddiisanaynaa inuu baahiyadeenna na siiyo. “Kibis maalin nagu filan, maanta na sii.” [Matayos 6:11]

6. Farta Afraad = Cafis. Imminka waxaan Ilaah weyddiisanaynaa inuu dembiyadeenna inaga cafiyo, waxaana qasab nagu ah inaan cafinno kuwa kale. “Oo naga cafi qaamahayaga sidaannu u cafinnay kuwa noo qaamaysan.”
[Matayos 6:12]

7. Far Yarada= Difaac. Kaddib waxaan weyddiisanaynaa difaac. “Oo jirrabaadda ha noo kaxayn, laakiin sharka naga du.” [Matayos 6:13]

8. Suulka [Mar kale] = Caabudaad.
AWaxaan ku so oaf jaraynaa sidii aan ku bilownay – waxaannu caabudaynaa Ilaaha Qaaddirka ah – “boqortooyada iyo xoogga iyo ammaanta adigaa leh weligaa. Aamiin.” [Matayos 6:13].

Usheeg 5 qofood sheekadaada iyo qisada Ciise toddobaadkan. Samee middan toddobaad kasta.

7. WAQTIYADA ADAG

BAADH: Falimaha Rasuullada 5:17-42; Matayos 5:43-44


FICIL U SAMAYN: Kooxda la wadaag wixii kuugu cuslaa ee kuu soo maray rumaysadkaaga awgii; sii sheeg

caqabadaha kale ee aad wajihi kartid; iyo sida aad uga dabbaalanayso – taasoo ah adkaan iyo jacayl – sidii Ciise na baray. Ducayso marka ay baahiyadu yimaaddaa. Qof walba ugu ducee sidii uu wadaaggiisu ahaa. Usheeg 5 qofood sheekadaada iyo qisada Ciise toddobaadkan. Samee middan toddobaad kasta.

8. IN KANIISAD LA NOQDO

BAADH: Falimaha Rasuullada 2:42-47, 1 Korintos 11:23-34

FICIL U SAMAYN: Falanqeeya baahiyada kooxda oo ah sidii ay kaniisad u noqon lahaayeen si la mid sidii aan hadda qoraalka ka soo akhrinay. Si koox ahaaneed warqad cad ugu qora goobo oo samee adiga oo kooxdaada matalaya. Dusheeda ku qor 3 Tiro: tirada sida joogtada ah u timaadda [taswiirta qofka u eg], tirada Ciise rumaysan [iskutallaab] iyo tirada la baabtiisay kaddib markii ay rumaysteen [biyo].



Haddii kooxdaada ay ka go’an tahay in ay kaniisad noqdaan samee goobaabin. Haddii aad si joogto ah ficil ahaan u samayn kartaan waxyaabahan soo socda oo diillinta jiidjiidka leh ha samayn, dabadeed ku sawir sheyada goobada ku dhex jira. Haddii aadan sheyada samayn karin ama cid kale ka sugaysaan inuu idiin sameeyo, dabadeed sheyada ku sawir goobada korkeeda adiga oo adeegsanaya diillinta jeexjeexa leh.

1. U taagan in ay kaniisad noqdaan: liidka is wata oo aan ahayn kan jeexjeexa leh.
2. Baabtiis-biyo
3. Baybal-Buugga
4. Ciise oo la maammuuso-kibista iyo bakeeriga
5. Is weheshi-wadnaha
6. Bixinta iyo adeegga-calaamadda lacagta
7. Salaadda-Gacmo Ilaah baryaya
8. Ammaan-Gacmo sare loo qaaday
9. Dadka oo Ciise loo sheegayo-saaxiib gacanta qabanaya saaxiib kale
10. Isaga ayaan hoggaan u noqonaya rumaysadka
11. Hoggaamiye-labada weji ee dhoollo caddaynaya

Maxaa kooxdaadu tebaysaa oo ka maqan si ay u noqdaan kaniisad caafimaad leh?

Usheeg 5 qofood sheekadaada iyo qisada Ciise toddobaadkan. Samee midan toddobaad kasta.

MEESHEE KU XIGTA?

dhex mar labada qaab ee nidaamka Soo Shaac Bixinta iyo kan xoojinta ee 3/3 ama Baybalka kitaab ka dhex dooro sida Yooxannaa ama Markos [oo kulan walba ka qiso ka soo qaado].

TAXANE AH SOOSAARID

[oo ay leeyihiin Kooxaha u Baahan waxyaabaha Aasaasiga ah ee Baybalka iyo meelaha ugu caansan]

Istixmaal tuducyada soo socda marka aad "BAADHIS" ku samaynaysid kooxdaada. Cutubyada qaar, wax hal kulan ka badan ayey kooxdaadu u baahan tahay.



Baadhista Aqoonsashada Ilaah-kan uu Ilaah yahay iyo waxa uu u eg yahay

1. Abuuris-Bilowgii 1
2. Abuuristii Dadka-Bilowgii 2
3. Caasinnimadii Dadka-Bilowgii 3
4. Nuux iyo Daadkii-Bilowgii 6:5-8:14
5. Ballankii Ilaah la Galay Nuux-Bilowgii 8:15-9:17
6. Ilaah oo la Hadlaya Ibraahim-Bilowgii 12:1-7; 15:1-6
7. Daa'uud oo Boqor u Noqday Farcankii Ibraahim -1 Samuu'eel 16:1-13; 2 Samuu'eel 7:1-28
8. Boqor Daa'uud iyo Betshebec-2 Samuu'eel 11: 1-27
9. Qisadii Naataan-2 Samuu'eel 12:1-25
10. Ilaah oo Ballan qaaday in Badbaadiyuhu Imanayo-Ishacyaah 53

Baadhista Aqoonsashada Ciise-kan uu yahay Ciise iyo waxa uu u yimid

1. Badbaadiye ayaa dhashay-Matayos 1:18-25
2. Ciise baabtiiskiisii-Matayos 3:7-9, 13-15
3. Ninkii Waalnaa ee La Bogsiiyay-Markos 5:1-20
4. Ciise Marna Idihiisa ma Lumin-Yooxannaa 10:1-30
5. Ciise oo Bogsiiyay kii Indhaha La'aa-Luukos 18:31-42
6. Ciise iyo Sakhiyos-Luukos 19:1-9
7. Ciise iyo Matayos-Matayos 9:9-13
8. Ciise waa Jidka Keliya-Yooxannaa 14:1-



15

- 9. Ruuxa Qudduuska ah oo Imanaya-Yooxannaa 16:5-15
- 10. Cashadii ugu Dambaysay-Luukos 22:14-20
- 11. Xidhiddii iyo Xukunkii-Luukos 22:47-53; 23:13-24
- 12. Dilkii-Luukos 23:33-56
- 13. Ciise oo Nool-Luukos 24:1-7, 36-47; Falimaha Rasuullada 1:1-11
- 14. Rumaysadka iyo Samaynta-Filiboy 3:3-9

TAXANE XOOJIN AH

[oo ay leeyihiin Rumaystayaasha Cusub ama Kooxaha u Baahan Adkaynta Xernimada]

Ciise Waxa uu Leeyahay-baro inaad addeecdid amarrada aasaasiga ah ee Ciise. Sii wad inaad wax ku saabsan Ciise aad la wadaagtid dadka liiska kuugu jira.

Baro oo samee-Yooxannaa 14:15-21!
Tawbadkeen. Rumayso. Raac. Maarkos 1:14-17, Efesos 2:1-10
Ha Lagu Baabtiiso-Matayos 28:19, Falimaha Rasuullada 8:26-38

Ilaah Jeclow. Dadka Jeclow-Luukos 10:25-37

Ciise Sidoo kale Wuxuu Leeyahay-baro inaad addeecdid amarrada aasaasiga ah ee Ciise. Sii wad inaad wax ku saabsan Ciise aad la wadaagtid dadka liiska kuugu jira. Ilaah la Hadal-Matayos 6:9-13. Baro oo ficil ahaan u samee habkii Salaaddii Ciise oo xusuusnow - Luukos 22:14-20, 1 Korintos 11:23-32

Wax Bixi-Falimaha Rasuullada 4:32-37 Wax sii Gudbi-Matayos 28:18-20

U Raac Sidii aan Aniguba u Raacay-Xer Samee. Kuwa kale u gudbi wixii aad baratay. Dadka kale sii bar si ay iyaguna u sii gudbiyaan.

Xer Hel-2 Timoteyos 1:1-14
Wax sii Gudbi-2 Timoteyos 2:1-4,

14-16

Bar si ay wax u sii baraan kuwa kale-2 Timoteyos 3:1-17 3.4 waqtiyada adag-2 Timoteyos 4:1-22

Labo jibbaar Kooxda 3/3 –Isku keen xertaada si kooxo cusub ay u aasaasaan.

Wax bilow oo qorshe samayso-Luukos 10:1-11. Maqal tilmaamihii Ciise marka aad bilaabaysid koox cusub. Isku Keen-Falimaha Rasuullada 2:14-47 Qof Nabadeed-Markos 5:1-20, 6:53-56. Raadso dadka doonaya ina kuwa kale la waddagaan sheekadooda ku saabsan Ciise. Kooxda ku dar qofkaas iyo saaxiibbadiisa iyo qoyskiisa. Yaa diyaar ah -Matayos 13:1-9, 18-23

Hoggaamin-baro sida loo hoggaamiyo kooxd 3/3 ah.

Tusaale [sida wax u hoggaami]-Yooxannaa 13:1-17

Tsaale [sidan wax ha u hoggaamin]- 3 Yooxannaa 5-14

Caawi-Maarkos 4:35-41
5.4 Ilaali-Luukos 10:1-11, 17, 20
5.5 Ka Tag-Matayos 25:14-30

U Bax: degaanka-baro sida loo gaadho bulshadaada. U bax: degaanka-Falimaha Rasuullada 1:1-8
Caawi saboolka. La wadaag warka wanaagsan - Luukos 7:11-23
Aad meeshii Ilaah kuu diro-Falimaha Rasuullada 10:9-48
6.4 Qorshe ku bax-Falimaha Rasuullada 13:1-3, 32-33, 38-39; 4:21-23, 26-27

Ubax: Caalamka-baro sida loo gaadho meesha dunidu ku dhammaato. Ubax: caalamka-Falimaha Rasuullada 1:1-8, Matayos 28:19-20



Aad meeshii Ilaah kuu diro-Falimaha
Rasuullada 8:26-38
Ilaah waa jecel yahay koox walba oo dad ah
-Yooxannaa 4:4-30, 39-417.4
Qorshe ku bax-Falimaha Rasuullada 13:1-3,
32-33, 38-39; 14:21-23,26-27

Xusuusnow waxyaabaha aasaasiga ah.

Baro waxa marka aad kulantaan la
samaynayo.
Ciise aya ugu horreeya -Filiboy 2:1-11
Ilaah la hadal-Matayos 6:9-13
Bulshada-Cibraaniyada 10:23-25
Baybalka-2 Timoteyos 3:10-17
Go'aan yeelo-baro qaabka sida adag loogu
taagnaado ee Ciise loogu raaco.
Baarrinimo-Yoonis 1
Go'aan-Yoonis 2
Addeecis-Yoonis 3
Jidadka oo dhan addeec-Yooxaana 4
Isticmaal ama lumi-Matayos 25:14-30

MEESHEE KU XIGTA ?

Dooro qaybahaaga Baybalka oo kulanka sii
wad. Adeegso isla su'aalaha ku jira
nidaamka kulanka kooxda. Marna kulanka ha
joojin.





badinta xerta